## Ardayga luqadda Ingiriisiga, ama ELL, waa ardayga haysata taageero dheeraada barashada Ingiriisiga gudaha Dugsiga. Waxaa jira 4.9 malyan ELLs gudaha Maraykanka*



*Sandkii 2016, sida waafaqsan Xarunta Qaranka ee Tirakoobka Waxbarashadda*

## Aqoonsashaqada ardayga sidii ELL



1. Waxaad ka jawaabtay waxa ku saabsan luqadda aad ku isticmaasho guriga.



2. Imtixaanka waxa uu qiyaasay xirfadaha Ingiriisiga akaadeemiga ah ee dhegaysiga, akhriska, hadalka, iyo qoraalka.



3. Ilmahaagu waxa uu ku qaadan karaa waxbarashadda Ingriiisiga, marka lagu daro fasalada kale.

ELLs waxay qaadaa imtixaanka luqadda Ingiriisiga ee akaademiga ah sanad kasta. Macluumaadka imtixaanku waxa uu ka caawiyaa macalimiinta inay qorsheeyaan sida ugu fiican ee wax loo baro ilmahaaga. Buundooyinku sidoo kale waxay ka caawiyaan macalimiinta inay  gartaan marka ilmahaagu uu joojin karo helida taageerada luqadda Ingiriisiga. Waxaad isticmaali kartaa macluumaadka imtixaanka si aad ugu doodo ilmahaaga xaga dugsiga. Kala hadal macalimiinta ilmahaaga wax ku saabsan"

- Marka aad heli doonto buundooyinka imtixaanka iyo sida loo raad raaco horumarka ilmahaaga.
- Sideed ku taageeraysaa ilmahaaga barashadiisa luqadda xaga guriga.
- Sida taageeradu isu beddesho marka ilmahaagu dhiso xirfadaha luqadda Ingiriisiga Akaademiga ah.
- Marka ardaydu joojiso helida taageerada luqadda Ingiriisiga.

---

**Su'aalaha aad waydiin karto**

- Waa maxay hadafyada ilmahaygu?
- Sidee barashada Ingiriisigu ugu habboon tahay xirfadaha kale ee ilmahaygu baranayo?
- Sidee ayaad ugu dartaa luqaddaha ardayda iyo dhaqamada xaga dugsiga?

---

**Waydii wax ku saabsan barashadda luqadda Ingiriisiga dugsiga ilmahaaga.**
**Ardayda waxaa lagu imtixaamaa sanad kasta, laakiin waxaad leedahay xaqa aad ku aqbasho ama ku diido taageerada luqada.**

WIDA waxay ku jirtaa Xarunta Wisconsin ee Cilmi baadhida Waxbarashadd xaga Jaamacada Wisconsin-Madison.
© 2020 Guddida Regents ee Nidaamka Jaamacada Wisconsin, iyaddoo metalaysa WIDA.